

# Su'aallaha Badanaa La Isweydiyo

2022 Sahanka Deganayaasha Guryaha Dadweynaha  
Reer Fiktooriya



## RASMI

Somali

Soomaali

## Sahanku muxuu ku saabsan yahay?

Homes Victoria waxay raadinaysaa aragtida iyo fikradaha dadka ku nool guryaha dadweynaha dhamaan Fiktooriya. Sahanku wuxuu weydiin doonaa deganayaasha guryaha waxay u malaynayaan guryahooda, adeegyada gurisiinta, dareemida amaanka iyo amniga, iyo ku xirnaantooda deriskooda.

## Waa Maxay sababta Homes Victoria wax u weydiinayso dadka ku nool guryaha dadweynaha?

Macluumaadka laga ururiyey Victorian Public Housing Resident Survey waxay caawimi doonaan Homes Victoria si ay u yeeshaan faham wanaagsan oo la xiriirta baahida deganayaasha, waxay rabaan iyo khibradooda. Homes Victoria waxay isticmaali doonaan macluumaad si loogu qorsheeyo adeegyo wanaagsan loolana shaqeeyo bulshada si loo wanaajiyo arrimaha aad muhiimka ugu ah iyaga.

## Ma in aan sahanka sameeyaa?

Maya. Buuxinta sahanka khasab maahaa. Haddii deganayaasha guryaha dadweynuhu doortaan in aanay buuxin sahanka, ma saamaynayso guriyeyntooda ama adeegyada gurisiinta. Homes Victoria ma ogaanayso inaad ka qaybgashay iyo in kale.

## Maxay tahay Roy Morgan?

Roy Morgan waa shirkad cilmi baariseed oo Australiyaan ah taas oo ka baxsan shaqada Homes Victoria. Waxay leeyihiin kooxa cilmi baarayaal ah iyo kuwa waraysi ka qaada Australiya oo dhan. Waxay samaynayaan sahan iyaga oo ku hadlaya magaca Homes Victoria.

## Maxay Roy Morgan u haystaan faahfaahintayda?

Homes Victoria ayaa siisay meelaha lagala xiriiro deganayaasha Roy Morgan taas oo si adag u khusaysa ujeedada qabashada sahanka. Waxaa jirta shuruuc adag oo shaqaysa taas oo si adag u xafida macluumaadkaaga. Macluumaad kasta oo ay hayaan Roy Morgan waa la baabinayaa dhamaadka sahanka.

## Maxay ku lug yeelanaysaa haddii aan ogolaado sahankaan?

Waraysi qaade ka socda Roy Morgan ayaa la soo xiriiri doona degayanayaasha gurisiinta si ay u weyddiyaan haddii ay jeclaan lahaayeen inay buuxiyaan sahan. Haddii aad ogolaato inaad ka qaybgasho, waxaad ku samayn kartaa sahanka telefoonka ama online-ka.

Sahanku wuxuu qaadan doonaa wax aan ka badnayn 15 daqiiqo si loo buuxiyo foomka. Haddii aad doonaysa inaad ku buuxiso sahanka luqad aan ka ahayn Ingiriis, waxaad codsan kartaa mutarjum.

Waad ka bixi kartaa sahanka heer kasta, xataa haddii go'aansato inaad ka qaybqaadato ka dibna isbedesho.

## Dhamaan deganyaashu ma leeyihiin fursada ay kaga qaybqaataan?

Maya. Waraysi qaadayaasha ka socda Roy Morgan ayaa ula soo xiriiri doona koox deganayaal ah si aan qorshaysnayn kuwa degan guryaha dadweynaha haddii ay doonayaan inay ka qaybqaataan. Kuwa ka qaybqaadanaya si aan ku talagal ahayn ayaa loo doortaa iyada oo ku salaysan da'dooda, sinjigooda iyo goobta ay kaga nool yihiin Fiktooriya. Taas waxaa asal u ah Homes Victoria oo jeclaan lahayd inay maqasho codadka deganyaasha leh da' walba, jinsi walba iyo dadka magaala weynta iyo gobolada Fiktooriya.

## Ka qaybgelida sahanku ma mid aan la ogaanayn baa?

Haa. Homes Victoria weligood arki maayaan xogta sheegaysa shakhsiyadka. Magaca laguuma xusayo sinaba, kuwaas oo ay ku jiraan warbixinada gudaha iyo dukumintiyada.

## Lacag ma la igu siinayaa sahanka?

Haa. Waxaad heli doontaa \$10 oo ah foojarka supermarket-ka si looga mahadceliyo waqtigaad ku bixisay. Foojarka ka mahadcelinta waqtigaaga waxaa kuu soo diri doonta Roy Morgan marka la dhamaystiro sahanka.

## Yaan u dacwoonayaa haddii aanan ku faraxsanayn sahanka ama in la ila soo xiriiray?

Haddii aad ka welwelsan tahay sida macluumaadkaaga loo isticmaalay, aadan ku faraxsanayn sahanka ama aadan ku faraxsanayn sida laguula soo xiiriray, fadlan la xiriir unuga Dib-u-qaabaynta Guriyaynta (Social Housing Reform) adiga oo email u diraya [shr@homes.vic.gov.au](mailto:shr@homes.vic.gov.au).

## Sidee ku arki karaa natiijooyinka sahanka?

Homes Victoria ayaa ku soo diri doonta natiijada [sahanka](https://www.housing.vic.gov.au/about/housing-news/2020-victorian-public-housing-resident-survey) <<https://www.housing.vic.gov.au/about/housing-news/2020-victorian-public-housing-resident-survey>> aakhirka 2022 websaytka Xafiiska Gurisiinta (Housing website.) Taasi waxay kaloo tahay meeshaad ku arki karto natiijooyinka sahankeena 2020, halkaas oo Homes Victoria ku maqli doonto in ka badan 3,500 oo ah deganyaasha guryaha dadweynaha.

Si loogu hello dukumintigaan hab kale, email u dir [SHR](mailto:shr@homes.vic.gov.au) <shr@homes.vic.gov.au>.

Waxaa ansixisay oo daabacday Xukuumada Fiktooriya, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Xukuumada Fiktooriya, Australia, Department of Families, Fairness and Housing, Febraayo 2022.

Waxaa laga hellaa [2022 Sahanka Deganayaasha Guryaha Dadweynaha \(Victorian Public Housing Resident Survey\)](https://www.housing.vic.gov.au/about/housing-news/2022-victorian-public-housing-resident-survey) <https://www.housing.vic.gov.au/about/housing-news/2022-victorian-public-housing-resident-survey>